

Filing a Postconviction Appeal at the Minnesota Court of Appeals Gudbinta Racfaan kadhanka ah xukun horay udhacay oo loo gudbiyo Maxkamada Racfaanka ee Minnesota

Revised March 8, 2024/Wakhtigii Qoraalka 8dii Maarso, 2024

This packet is provided as a general guide to the process of appealing from a district court order denying a postconviction petition. These instructions explain the steps to start an appeal and answer common questions, but are not a full guide to the law.

Buuggaan waxaa loogu talagalay inuu tilmaan guud kabaxsho hanaanka racfaanka looga qaato amarka maxkamada degmada ee lagu diidaayo racfaanka xukunka kadib. Tilmaamuhu waxay sharxayaan talaabooyinka aad kubilaabayso racfaanka kadhanka ah maamulka iyo sida aad uga jawaabayso su'aalaha guud, laakiin maaha tilmaamo buuxa oo sharciga laga bixinaayo.

Please read this entire packet carefully. If you do not understand any of the steps or do not know if these forms are right for your situation, you should speak with an attorney for legal advice.

Fadlan akhri dhamaan buggaan si taxadar leh. Haddii aadan waxba kafahmin talaabooyinka ama aadan aqoon in foomamkaan ay yihiin kuwo xaaladaada kuhabboon iyo hadii kale, waa inaad kala hadashaa qareen si uu talo sharci kuusiiyo.

This packet only covers postconviction appeals to the Minnesota Court of Appeals. If you were convicted of first-degree murder, your postconviction appeal must be filed with the Minnesota Supreme Court. If you are filing a type of criminal appeal other than from a decision on a postconviction petition, consult the Minnesota Rules of Criminal Procedure and the online materials for criminal appeals.

Buugu wuxuu kaliya kahadlayaa racfaanada kadib xukunka oo loodiraayo Maxkamada Racfaanada ee Minnesota. Haddii lagugu eedeeyo inaad tahay qof dil gaysatay, racfaankaaga xukunka kadib waa in laga buuxshaa Maxkamada Sare ee Minnesota. Haddii aad buuxinayso nooc kamid ah racfaanka danbiga ee aan ka ahayn go'aanka kasoo baxa racfaanka xukunka kadib, katalo qaado Xeerarka Hanaanka Dacwada Danbiga ee Minnesota iyo macluumaadka oonleenka ah ee racfaanada danbiga.

This packet includes/Buuggaan waxaa kujira:

- Step-by-Step Instructions for Filing a Postconviction Appeal
Tilmaamaha Talaabo-talaabada ah ee qaabka aad Ubuuxinayso Racfaan Kadhanka ah Xukunka horay udhacay
- Form: Notice of Appeal
Foomka: Ogaysiiska Racfaanka
- Form: Statement of the Case of Appellant
Foomka: Bayaanka Kiiska Racfaan qaataha
- Form: Appellant’s Certificate of Service by Mail of Notice of Appeal and Statement of the Case
Foomka: Shahaadada Adeegga ee Racfaan Qaataha ee Boostada Lagu diro Ogaysiiska Racfaanka iyo Bayaanka Kiiska
- Form: Appellant’s Certificate of Service by Mail of Brief
Foomka: Shahaadada Adeegga Racfaan qaataha ee Boostada lagu diray ee Dacwada Kooban

For Additional Assistance/Wixii Caawimaad dheeri ah:

Additional helpful materials, including example briefs, can be found on the Minnesota State Law Library website (<https://mncourts.libguides.com/appeals>).

Macluumaad dheeri ah oo faaiido muhiim ah, ayna kujiraan tusaalayaasha dacwadaha kooban, waxaa laga helayaa webseetka Maktabada Sharciga ee Gobalka Minnesota oo ah (<https://mncourts.libguides.com/appeals>).

Questions can be directed to the State Law Library at (651) 297-7651, or the Office of the Clerk of the Appellate Courts at:

Su’aalaha waxaa loodiri karaa Maktabadaha Sharciga Gobalka ayagoo laga wacaayo (651) 297-7651, ama Xifiiska karaniga Maxkamadaha Racfaanka:

Clerk of the Appellate Courts
305 Minnesota Judicial Center
25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd.
St. Paul, MN 55155
(651) 291-5297

Please note that court employees can give general information about court rules and procedures, but they cannot give legal advice.

Fadlan ogsoonow shaqaalaha maxkamadu waxay awoodaan inay macluumaad guud kaasiyaan xeerarka maxkamada iyo hanaanada laraacaayo, laakiin kuma siin karaan talo sharci.

Important Information about Postconviction Appeals Macluumaadka Muhiimka ah ee Kusaabsan Racfaanada Xukunka Kadib

Eligibility for Public Defender/Uqalmida Difaaca Dawlada

If this is your first appeal on this conviction, and you meet certain financial eligibility requirements, you may be entitled to a public defender for your appeal. Contact the Office of the Minnesota Appellate Public Defender for application forms and instructions:

Haddii kani yahay racfaankaagii koobaad oo xukunkaan kaqaadato, waxaad buuxinaysaa shuruudo gaar ah oo dhanka uqalmida ah, waxaad heli kartaa difaac dawladu kaabixiso oo racfaanka lagaa siiyo. Laxariir Xafiiska Difaaca Dawladu Bixiso ee Racfaanka Minnesota si aad uhesho foomamka codsiga iyo tilmaamo:

Office of the Minnesota Appellate Public Defender
540 Fairview Avenue North, Suite 300
St. Paul, MN 55104
(651) 219-4444

You might *not* be entitled to a public defender if you had a previous appeal involving the same conviction, and you were represented by an attorney from the Office of the Minnesota Appellate Public Defender in that appeal. See [Minn. Stat. § 611.25, subd. 1\(a\)\(2\)](#); [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 5](#).

Waxaa suurtagal ah *inaan* lagu ogolaan difaaca ay dawladu qarashkiisa dhiibto haddii aad horay racfaan uga gudbisay isla xukunka, uuna kumatalaayay qareen kasocda Xafiiska Difaaca Dawladu Bixiso ee Racfaanka Minnesota oo kumatalaayay racfaankaas. *Kafiiri* [Minn. Stat. § 611.25, subd. 1\(a\)\(2\)](#); [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 5](#).

Court of Appeals Opinions are Available to the Public **Dookhyada Maxkamada Racfaanada waxaa heli Kara Bulsho waynta**

Once your appeal is decided, the Court of Appeals will issue a written decision, called an “opinion,” which will describe your case and the reasons for the court’s decision. **The opinion will be available to the public on the Minnesota Judicial Branch’s website.** After an opinion is filed, it cannot be removed from the Internet. This means that anyone who searches for your name on the Internet may be able to find and read the opinion.

Marka go’aan laga gaaro racfaankaaga, Maxkamada Racfaanadu waxay soo saaraysaa go’aan qoran, oo loogu yeero “Fikirka,” taasoo sharaxaysa kiiskaaga iyo sababaha loo cuskaday go’aanka maxkamada. **Fikirku wuxuu ufunnaan doonaa dadwaynaha ayagoo ka arkaaya webseetka Waaxda Garsoorka ee Minnesota.** Kadib marka labuuxiyo bayaanka fikirka, lagama saari karo interneetka. Tani waxay kadhigan tahay in qofkasta oo magacaaga kabaara interneetka uu awoodi doono inuu helo uuna akhriyo fikirka.

Laws that Apply to your Appeal/Sharciyada Qabanaaya Racfaankaaga

Your appeal is governed by the Minnesota Rules of Criminal Procedure ([particularly Minn. R. Crim. P. 28.02, subds. 2 and 4](#)), the Minnesota Rules of Civil Appellate Procedure, the Special Rules of Practice for the Minnesota Court of Appeals, and the Minnesota Statutes, as well as case law (cases previously decided and published by the Minnesota Supreme Court and Minnesota Court of Appeals).

Racfaankaaga waxaa maammula Xeerarka Minnsota ee Hanaanka Danbiyada ([gaar ahaana Minn. R. Crim. P. 28.02, subds. 2 iyo 4](#)), Xeerarka Madaniga ah ee Hanaanka Racfaanka ee Minnesota, iyo Qawaaniinta Minnesota, iyo sidoo kale sharciga kiiska (kiisaska horay loo go'aanshay ayna usoo saartay Maxkamada Sare ee Minnesota iyo Maxkamada Racfaanada Minnesota).

This packet includes simplified instructions, but you should read the rules and statutes yourself for more information. **If you are representing yourself, you are responsible for researching court rules, case law, and statutes that govern your case.**

Buuggaan waxaa kujira tilmaamo fudud, waa inaad adigu akhrisataa xeerarka iyo qawaaniinta si aad macluumaad dheeri ah u ogaato. **Haddii aad matalayso naftaada, adigga ayaa masuul ka ah baarista xeerarka maxkamada, sharciga kiiska, iyo qawaaniinta qabanaaya kiiskaaga.**

You can find the rules and statutes at the Minnesota State Law Library (Room G25, Minnesota Judicial Center, 25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd., St. Paul, MN 55155, or call 651-297-7651), and at public libraries. You can also find the rules at the Minnesota Judicial Branch's website: <http://www.mncourts.gov/About-The-Courts/SupremeCourt/CourtRules.aspx>.

Waxaad kahelaysaa xeerarka iyo qawaaniinta Maktabada Sharciga Gobalka Minnesota (Room G25, Minnesota Judicial Center, 25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd., St. Paul, MN 55155, ama wac 651-297-7651), iyo maktabadaha dadwaynaha. Waxaa sidoo kale kahelaysaa xeerarka Webseetka Waaxda Garsoorka ee Minnesota: <http://www.mncourts.gov/About-The-Courts/SupremeCourt/CourtRules.aspx>.

No Filing Fees/Majiro Qarash Lagu Qaadaayo Gudbinta Dacwada

No filing fees are required to file a postconviction appeal. [Minn. Stat. § 590.06](#).

Majiro qarash lagaaga qaadaayo buuxinta racfaanka xukunka kadib ah. [Minn. Stat. § 590.06](#).

Important Information about your Appeal Macluumaadka Muhiimka ah ee Kusaabsan Racfaanka

Your Forms Must be Filled Out in English Foomamkaaga waa in lagu Buuxshaa Af-Ingiriis

The forms in the attached packet are worded in both English and the translated language. But your answers on the form must be provided in English. If you are unable to fill out your forms in English yourself, you will need to arrange for someone to assist you to word your answers in English.

Foomamka kujira baakada lifaaqa kujirta waxay kuqoran yihiin labadaba luuqada Ingiriiska iyo luuqada Soomaaliga. Laakiin jawaabahaaga foomka waa in lagu qoraa Af-Ingiriis. Haddii aadan awoodin inaad buuxiso foomamkaaga adoo kujawaabaaya luuqada Ingiriiska oo aad adigu qortay, waa inaad diyaarsataa qof kaacaawiya qorista jawaabahaaga oo Af-Ingiriis ah.

Your Brief Must be Written in English Sharaxaada Kooban ee Dacwadaada waa in lagu qoraa Af-Ingiriis

A major part of your appeal is your *brief*, which is where you will make your legal arguments supporting the outcome you are seeking in your appeal. Your brief will likely require some legal research into the statutes and case law that apply to your appeal. The brief must be written in English. If you are unable to write your brief in English yourself, you will need to arrange for someone to assist you researching and writing your brief in English.

Qayb wayn oo kamid ah racfaankaaga ayaa ah *sharaxaada kooban ee dacwadaada*, taasoo ah meesha aad dooda sharci kuqorayso taasoo taageeraysa natiijada aad doonayso inay kasoo baxdo racfaankaaga. Sharaxaadaada kooban waxay ubadan tahay inay ubaahato baaritaan sharci oo aad kusamayso qawaaniinta iyo kiiska sharciga quseeya racfaankaaga. Sharaxaada kooban ee dacwadaada waa in lagu qoraa Af-Ingiriis. Haddii aadan awoodin inaad buuxiso sharaxaada kooban adoo kujawaabaaya luuqada Ingiriiska oo aad adigu qortay, waa inaad diyaarsataa qof kaacaawiya baarista iyo qorista sharaxaadaada kooban oo Af-Ingiriis ah.

Step-by-Step Instructions for Filing a Postconviction Appeal

Tilmaamaha Talaabo-talaabada ah ee qaabka aad Ubuuxinayso Racfaan Kadhanka ah Xukunka horay udhacay

Step 1: Calculate Your Appeal Deadline

Talaabada 1: Xisaabi Waqtiga Kama danbaysta ah ee Racfaankaaga

After the district court files an order denying part or all of your petition for postconviction relief, you have 60 days to appeal to the Court of Appeals. See [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 2](#); [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 4\(3\)\(c\)](#).

Kadib markay maxkamada degmadu soosaarto amar ay kudiidayso qayb ama dhamaan racfaankaaga ku aadan in lagaa fududeeyo xukunka, waxaad haysataa 60 maalmood inaad racfaan ugu gudbiso Maxkamada Racfaanada. *Kafiiri* [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 2](#); [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 4\(3\)\(c\)](#).

Note: Other types of criminal appeals, such as direct appeals of felony or misdemeanor convictions, have very different filing deadlines. Read [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 4\(3\)](#) to confirm the deadline that applies to your appeal.

Ogoow: Noocyada kale ee racfaanada danbiga, sida racfaanada degmada ee dadka wax dila ama xukunada danbiyada caruurto gasho, waxay leeyihiin xili aad gaar ugu ah oo kiiskooda lagu qaado. Akhri [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 4\(3\)](#) si aad uxaqiijsi waqtiga kama danbaysta u ah racfaankaaga.

Your appeal time begins to run on the date that the district court administrator files the order; not when you receive a copy of the order. See [Minn. R. Crim. P. 33.03](#). The Court of Appeals can extend the appeal deadline for up to 30 additional days, but you must file a motion for an extension, and your motion must show “good cause” to get an extension. See [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 4\(3\)\(g\)](#). For instructions about motions, see page 27.


Waqtiga racfaankaagu wuxuu bilaabayaa inuu socdo taariikhda uu maamulaha maxkamada degmadu uu soosaaro amarka; mana bilaabmaayo marka aad hesho koobiga amarka. *Kafiiri* [Minn. R. Crim. P. 33.03](#). Maxkamada Racfaanada ayaa kordhin karta muddada ay ku egtahay racfaan qaadashadu kuna dari karta ilaa 30 maalmood oo dheeri ah, laakiin waa inaad gudbisaa codsiga dheeraynta muddada, codsigaaguna waa inuu muujiyaa “sabab wanaagsan” oo aad kuheli karto mudo kordhin. *Kafiiri* [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 4\(3\)\(g\)](#). Wixii kusaabsan tilmaamaha codsiga, kafiiri bogga 27.

General Instructions for Calculating Court of Appeals Deadlines

Tilmaamaha guud ee xisaabinta Waqtiyada ay ku egyihiin Racfaanada Maxkamadu

- Do not count the day of the event that starts the time period (for example, the date the district court administrator files the order). Instead, start counting the next day. [Minn. R. Crim. P. 34.01](#).
Ha xisaabin maalinta dacwadu dhacayso taasoo kabilaabanta waqtiga (tusaale ahaan, taariikhda maamulaha maxkamada degmadu gudbiyo amarka maxkamada). Taas badalkeed, kabiloo tirinta maalinta xigta. [Minn. R. Crim. P. 34.01](#).
- Continue counting calendar days. Do not skip weekends or legal holidays. Siiwad tirinta maalmaha kalaandarka. Haka boodin maalmaha dhamaadka asbuuca ama fasaxyada sharciga ah.
- If the last day of the period falls on a Saturday, Sunday, or legal holiday, then the deadline is the next business day. For the purpose of calculating deadlines, legal holidays for the appellate courts are:
- Haddii maalinta ugu danbaysa ee muddadu noqoto maalin Sabti ah, Axad ah, ama maalin sharciyani fasax ah, markaas maalinta kama danbaysta ah waxay noqonaysaa maalinta xigta ee shaqada. Sababo laxariira tirinta maalmaha kama danbaysta ah ee dacwada, maalmaha fasaxa u ah maxkamadaha racfaanka ayaa ah:
 - New Year’s Day (January 1);
Maalinta Sanadka Cusub (Janaayo 1);
 - Martin Luther King, Jr.’s birthday (the third Monday in January);
Maalinta Dhalashada Martin Luther King, Jr. (Isniinta sadexaad ee bisha Janaayo);
 - Presidents’ Day (the third Monday in February);
Maalinta Madaxwaynaha (Isniinta saddexaad ee Feebaraayo);
 - Memorial Day (the last Monday in May);
Maalinta Xuska (Isniinta ugu danbaysa bisha Maajo);
 - Juneteenth (June 19)/Feystada Juneteenth (19kii Juun);
 - Independence Day (July 4);
Maalinta Xornimada (Luuliyo 4);
 - Labor Day (the first Monday in September);
Maalinta Shaqaalaha (Isniinta ugu horaysa bisha Sibteembar);
 - Columbus Day (the second Monday in October), even though the appellate courts are open on Columbus Day;
Maalinta Columbus (Isniinta labaad ee Oktoobar), inkastoo Maxkamadaha Racfaanku furan yihiin Maalinta Columbus;
 - Veterans’ Day (November 11);
Maalinta Halyeeyga (Nofeembar 11);
 - Thanksgiving Day (the fourth Thursday in November);
Maalinta Mahad Naqa (Khamiista Afaraad ee Nofeembar);
 - The Friday after Thanksgiving; and
Jamcada Kadanbaysa Maalinta Mahad Naqa; iyo
 - Christmas Day (December 25).
Maalinta Kiristaanka (Diseembar 25).

- The date the district court administrator filed the order was _____.
Maalinta maamulaha maxkamada degmadu gudbiyo amarka ayaa ahayd



- The deadline for my appeal is _____.
Taariikhda Kama danbaysta ah ee Racfaankayga ayaa ah

Note: Before the deadline for your appeal (on the line above), the *Notice of Appeal* must be **filed** with the Clerk of the Appellate Courts and **served** on all respondents (steps 2-5 provide instructions for filing and serving documents).

Ogoow: Kahor intaan taariikhda kama danbaysta ah ee racfaankaaga (ee kuqoran laynka kore), *Ogaysiiska Racfaanka* waa in **lagudbiyaa** loona dhiibaa Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka lana siiyaa **dhamaan** dhinacyada dacwada iskadifaacaaya (talaabooyinka 2-5 ayaa kusiinaaya tilmaamaha buuxinta iyo qaybinta dukumiintiyada).

If you do not file and serve the *Notice of Appeal* by the deadline, your appeal will be dismissed. Haddii aadan gudbin aadana qaybin *Ogaysiiska Racfaanka* muada loo asteevay, racfaankaaga waa latuurayaa.

Step 2: Fill out the *Notice of Appeal* and *Statement of the Case*
Talaabada 2: Buuxi *Ogaysiiska Racfaanka* iyo *Bayaanka Kiiska*

- Fill out the *Notice of Appeal*, which tells the court that you want to appeal. A *Notice of Appeal* form is attached to this packet.
Buuxi *Ogaysiiska Racfaanka*, kaasoo usheegaaya maxkamada inaad racfaan qaadanayso. Foomka *Ogaysiiska Racfaanka* ayaa kulifaaqan baakadaan.
- Fill out the *Statement of the Case*, which should *briefly summarize* the reasons you think the district court's decision was incorrect. You do not need to make detailed arguments in the *Statement of the Case*, because you will make detailed arguments later in your *Brief*. A *Statement of the Case* form is attached to this packet. You may attach a copy of the district court's order denying your petition for postconviction relief, but do not attach any other documents to your *Statement of the Case*.
Buuxi *Bayaanka Kiiska*, kaasoo *ay tahay inuu si kooban usharaxo* sababaha aad u aaminsan tahay in go'aanka maxkamada degmadu uu ahaa mid qaldan. Uma baahnid inaad gudbiso dood faahfaahsan markaad qorayso *Bayaanka Kiiska*, waayo waxaad doodaada oo faahfaahsan kuqoraysaa hadhoow foomka dacwada **Kooban**. Foomka *Bayaanka Kiiska* wuxuu kulifaaqan yahay baakadaan. Waxaad lifaaqa soo raacin kartaa amarka maxkamada degmadu ay kudiiday dacwadaada fududaynta xukunka horay udhacay, laakiin hasoo raacin dukumiintiyada kale lifaaqa *Bayaanka Kiiskaaga*.

Some questions on the *Statement of the Case* may require you to complete some basic legal research about your appeal before you can complete them. Detailed instructions for completing this form are available at <https://mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab04Forms>.

Su'aalaha qaar oo kujira **Bayaanka Kiiska** waxay kaaga baahan karaan inaad buuxiso qaarna inaad kabaadho sharciga ku saabsan racfaankaaga ka hor inta aadan buuxin.

Tilmamaha buuxinta foomkaan oo faahfaahsan waxaa laga heli karaa <https://mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab04Forms>.

The party who files the appeal is called the “appellant.” In a postconviction appeal, the other party is the State of Minnesota and is called the “respondent.” The State of Minnesota is represented by the county attorney and the Minnesota Attorney General. The title of a postconviction appeal is: “(Your name), petitioner, Appellant, vs. State of Minnesota, Respondent.”

Dhinaca gudbinaaya racfaanka waa loogu yeeraa “racfaan qaate.” Racfaanka xukunka kadib, dhinacyada kale ee kusugan gobalka Minnesota waxaa loogu yeeraa “eedaysane.” Gobalka Minnesota waxaa wakiil ah qareenka degmada iyo qareenka Guud ee Minnesota. Ciwaanka Racfaanka xukunka kadib: “(Magacaaga), dacwoode, Racfaan qaate, kadacwoonaaya. Gobalka Minnesota, Eedaysane.”

The *Statement of the Case* asks whether you are requesting oral argument, but oral argument will not be allowed if any party does not have an attorney. The *Statement of the Case* asks you to indicate which format you will use when you file your *brief*: formal, informal, or previously submitted memorandum of law with a short letter argument. Refer to Step 9 on page 24 for information about the different format options for your *brief*.

Bayaanka **Kiisku** wuxuu kuwaydiinayaa inaad codsanayso dood afka ah, laakiin dood afka ah lama ogola hadaan labada dhinac wax kamid ah haysan qareen. Foomka **Bayaanka Kiisku** wuxuu kuwaydiinayaa inaad sheegto qaabka aad u adeegsan doonto buuxinta foomkaaga **dacwada kooban**: qaab rasmi ah, aan rasmi ahayn, ama heshiiskii isfahanka ah ee horay loogudbiyay oo ay lasocoto waraaq sharaxaad gaaban kabixinaysa doodaada. Kafiiri talaabada 9 ee kuqoran bogga 24 si aad uhesho macluumaad kusaabsan dookhyada qaababka kaladuwan ee aad udiyaarin karto **Koobista Dacwadaada**.

Fill in all of the blanks on the forms. If you do not fill out all of the blanks, the Clerk of the Appellate Courts may have to return the forms to you, and it may cause you to miss your deadline to appeal.

Buuxi dhamaan meelaha banaan ee foomamka. Haddii aadan buuxin dhamaan meelaha banaan, Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka ayaa kuguso celin kara foomaka, waxayna qasbaysaa inaad haleeli waydo waqtigii udagsanaa in racfaankaaga laqaado.

Step 3: File the *Notice of Appeal* and *Statement of the Case*
Talaabada 3: Gudbi *Ogaysiiska Racfaanka* iyo *Bayaanka Kiiska*

“Filing” means submitting or delivering documents to the Office of the Clerk of the Appellate Courts. Filing the *Notice of Appeal* is how you tell the Court of Appeals that you are starting an appeal.

“Buuxintu” waxay kadhigan tahay gudbinta ama gaynta dukumiintiyada aad ugayso Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka. Buuxinta *Ogaysiiska Racfaanku* waa qaabka aad ugu sheegto Maxkamadaha Racfaanka inaad bilaabayso racfaan qaadasho.

Choose your method of filing (see instructions below):

Dooro qaabka aad ubuuxinayso (kafiiri tilmaamaha hoose):

General Instructions for “Filing”/Tilmaamaha guud ee “buuxinta” racfaanka

Parties **without an attorney** may file documents by **mailing** the documents to the Clerk of the Appellate Courts, addressed to:

Dhinacyada **aan lahayn qareenka** waxay kusoo gudbin karaan dukumiintiyada **ayagoo boostada** ugu dira dukumiintiyada Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka, kuna diraaya ciwaanka:

Clerk of the Appellate Courts
 305 Minnesota Judicial Center
 25 Rev. Dr. Martin Luther King Jr. Blvd.
 St. Paul, MN 55155

For filing by postal mail, a document will be considered filed “on time” if it is deposited in the U.S. Mail by the deadline with correct postage and the correct address, even though the Clerk of the Appellate Courts will not receive the document on the day you deposit it in the mail.

Si aad ugu dirto boostada, dukumiintiga ayaa loo aqoonsanayaa mid lagusoo gudbiyay “waqtiga saxda ah” haddii lagu diro boostada Maraykanka xiliga loogu talagalay laguna diro boostada iyo ciwaanka saxda ah, inkastoo Karaaniga Maxkamadaha Racfaanku uusan heli doonin dukumiintiga isla maalinta aad kudirto boostada.

For simplicity, this packet only includes forms and instructions for filing by mail. This packet assumes that you are filing by mail. However, there are two other options for filing:

Si aan ufududayno, baakadaan waxaa kaliya kujira foomamka iyo tilmaamaha kugudbinta racfaanka boostada. Baakadaan waxay uqaadanaysaa inaad racfaanka kudirayso boostada. Hase yeeshee, waxaa jiro labo qaab oo kale oo aad kugudbin karto:

1) **Hand-delivering** them to the Clerk of the Appellate Courts during business hours (8:00 a.m. to 4:30 p.m. weekdays), or

Inaad si toos ah ugu gayso Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka inta lagu jiro saacadaha shaqada (8:00 a.m. ilaa 4:30 p.m. maamaha dhamaadka asbuuca), ama

- 2) **Submitting them electronically** through the appellate courts' e-filing system, E-MACS. Once you start to e-file in an appellate case, you must continue to e-file throughout the case – you cannot choose later to file in person or by mail. (**Note: All attorneys are required to use E-MACS and cannot file documents by mail or by hand-delivery to the Clerk of the Appellate Courts.**)

Inaad si eektaroonig ah kugudbiso adoo adeegsanaaya hanaanka gudbinta oonleenka ah ee maxkamadaha racfaanka, E-MACS. Markaad biloowdo inaad kiiska racfaanka kugudbiso qaab oonleen ah, waa inaad siiwadaa kugudbinta macluumaadka kiiska si oonleen dhamaan mudada kiiska kahartay – hadhoow madooran kartid inaad kiska kugudbiso qaab toos ah ama boostada. (**Ogsoonoow: Dhamaan qareenada waxa laga doonayaa inay adeegsadaan E-MACS kumana diri karaan dukumiintiyada boostada ama si toos ah uguma gayn karaan Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka.**)

For information about electronic filing and to submit documents electronically, go to the Clerk of the Appellate Courts' webpage (www.mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab05AppellateFiling). For additional instructions on filing, see [Minn. R. Civ. App. P. 125.01](#). **The Clerk's Office cannot accept filings by fax or email.**

Si aad macluumaad uga hesho buuxinta dacwad si oonleen ah iyo gudbinta dukumiintiyada si oonleen ah, booqo webseetka Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka oo ah (www.mncourts.gov/Clerk-of-Appellate-Courts.aspx#tab05AppellateFiling). Wixii tilmaamo dheeri ah oo laxariira gudbinta, kafiiri [Minn. R. Civ. App. P. 125.01](#). **Xafiiska Karaanigu ma aqbali karo dacwad lagusoo diray fakiska ama iimeelka.**

- Make four copies of each of the *Notice of Appeal* and *Statement of the Case*. Keep one copy of each document for your records.
Afar koobi kalaba midkasta oo kamid ah **Ogaysiiska Racfaanka** iyo **Bayaanka Kiiska**. Hayso koobiga dukumiinti kasta oo kamid ah diiwaanadaada.
- File the original of the *Notice of Appeal* and *Statement of the Case* with the Clerk of the Appellate Courts by mailing it to the address above.
Buuxi foomka rasmiga ah ee **Ogaysiiska Racfaanka** iyo **Bayaanka Kiiska** adoo ugudbinaaya Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka uguna gudbinaaya boostada ciwaankedu kor kuyaalo.
- File one copy of the *Notice of Appeal* and *Statement of the Case* with the district court of the county where the order you are appealing was filed, by mailing it to that court's address.
Gudbi mid kamid ah koobiyada **Ogaysiiska Racfaanka** iyo **Bayaanka Kiiska** una gudbi maxkamada degmada lagu sameeyay amarka aad racfaanka kaqaadanayso, adoo ugu diraaya ciwaanka boostada maxkamada.

Step 4: Serve the documents on the other parties
Talaabada 4: Udir dukumiintiga dhinacyada kale

Any time you submit a document to the Clerk of the Appellate Courts for filing, a copy must also be provided to all other parties at or before the time of filing. This is called “service.”

Markasta oo aad dirto dukumiinti aadna udirto karaaniga Maxkamadaha Racfaanka si aad racfan uga qaadato, waa in sidoo kale koobi loodiraa dhamaan dhinacyada xiliga ama kahor xiliga aad racfaanka gudbinayso. Tan waxaa looyaqaanaa “adeegga.”

Reminder: You must file the *Notice of Appeal* and serve it on the other parties by the deadline you calculated in Step 1, or your appeal will be dismissed.

Xasuuso: Waxaa qasab ah inaad gudbisa *Ogaysiiska Racfaankal* aadna udirtaa dhinacyada kale marka lagaaro xiliga aad kuxisaabisay Talaabada 1, ama racfaankaaga waa ladiidayaa.

General Instructions for “Service”/Tilmaamaha guud ee “Adeegga”

If a party has an attorney, you must serve the attorney rather than the party. If a party does not have an attorney, you may serve that party directly.

Haddii dhinac kujira dacwada uu matalaayo qareen, waa inaad dukumiintiga udirtaa qareenka halkii aad cida uu matalaayo kasiin lahayd. Haddii aan dhinac kujira kiiska uusan lahayn qareen, waxaad dukumiintiga siin kartaa qoladaas si toos ah.

You can serve **by mail** by depositing the documents, correctly addressed, in the U.S. Mail, with adequate first-class postage. You can serve documents by mail yourself.

Waxaad ugu diri kartaa **boostada** adoo dukumiintiga ugu diraaya, si sax ahana ciwaanka ugu qoraaya, Boostada Maraykanka, ado kudiraaya boostada heerka koobaad oo kuhaboon. Waxaad dukumiintiyada kudiri kartaa adigu boostada.

For simplicity, this packet only includes forms and instructions for service by mail. This packet assumes that you are serving the other parties by mail.

Si aan ufududayno, baakadaan waxaa kaliya kujira foomamka iyo tilmaamaha kugudbinta adeegga boostada. Baakadaan waxay uqaadanaysaa inaad dhinacyada kale dukumiintiga ugu dirayso boostada.

However, there are other methods of service:

Hase yeeshee, waxaa jiro qaabab kale oo adeegga loo gudbiyo:

(1) In person (“personal service”): Have another person hand-deliver the document. The person who hand-delivers the document must be 18 years or older and not a party to the appeal. You cannot serve a party in person yourself.

Si toos ah (“adeegga tooska ah”): Inaad qofkale udhiibto si uu toos ugu geeyo dukumiintiga. Qofka keena dukumiintiga waa inuu noqdaa 18 sano jir ama kawayn uusana qayb ka ahayn racfaanka. Adigu si toos ah uguma gayn kartid qolo kale si toos ah.

(2) Electronically: If you filed electronically using the appellate courts' e-filing system, E-MACS, you can serve the respondents electronically as well, if the respondents are registered in E-MACS.

Si elegtaroonig ah: Haddii aad si elegtaroonig ah adoo adeegsanaaya hanaanka gudbinta oonleenka maxkamadaha racfaanka, E-MACS, waxaad ugu diri kartaa eedaysanayaasha si elegtaroonig ah sidoo kale, haddii eedaysanaayo kadiiwaangashan yihiin E-MACS.

(3) If the recipient consents to another method of delivery, such as email or fax, you could also use that method for service.

Haddii qofka helaaya dukumiintiga uu ogolaado inaad qaab kale ugu keento, sida inaad iimeel ama fakis ugu dirto, waxaad adeegsan kartaa qaabkaas aad adeegga kugudbinayso.

For additional instructions on service, see [Minn. R. Civ. App. P. 125.02 and 125.03](#).

Wixii laxariira tilmaamaha dheeriga ah ee adeegga, fiiri [Minn. R. Civ. App. P. 125.02 iyo 125.03](#).

- Mail a copy of the *Notice of Appeal* and *Statement of the Case* to the prosecutor (county attorney).

Boostada kudir koobiga *Ogaysiiska Racfaanka* iyo *Bayaanka Kiiska* adoo udiraaya dacwad oogaha (qareenka degmada).

- Mail a copy of the *Notice of Appeal* and *Statement of the Case* to the Minnesota Attorney General by mail, by addressing your documents to:

Boostada ugu dir koobiga *Ogaysiiska Racfaanka* iyo *Bayaanka Kiiska* Qareenka Guud ee Minnesota adoo ugu diraaaya boostada, adoo dukumiintiyada kudiraaya dukuumiintiyada:

Minnesota Attorney General
1800 Bremer Tower
445 Minnesota Street
St. Paul, MN 55101

Step 5: File proof of service/Talaabada 5: Gudbi cadaynta adeegga

Every document submitted to the Clerk of the Appellate Courts for filing must be accompanied by a form stating that the document was served on the other parties to the appeal. This is called “proof of service.”

Dukumiinti kasta oo loodiyo Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka si dacwad loo qabto waa in lasoo raaciyaa foom sheegaaya in dukumiintiga lasiiyo dhinacyada kale ee racfaanka kujira. Tan waxaa looyaqaanaa “cadaynta adeegga.”

General Instructions for “Proof of Service”/Tilmaamaha guud ee “Cadaynta Adeegga”

If you serve papers by mail, in person, or by another delivery method (with the consent of the recipient), “proof of service” is required along with any document you file.

Haddii aad waraaqaha kudirto boostada, si toos ah, ama qofkale uu toos uqaado (markaad ogolaansho kahesho qofka loodiraayo), “cadaynta adeegga” ayaa loobaahan yahay in lasoo raacsho dukumiinti kasta oo soo gudbiso.

Usually, “proof of service” is (1) a notarized *Affidavit of Service* or (2) a *Certificate of Service*. The difference between an *Affidavit of Service* and a *Certificate of Service* is that a *Certificate of Service* does not need to be signed in front of a notary.

Badanaa, “cadaynta adeegga” waa (1) Cadaynta *Adeegga oo Nootaayaysan* ama (2) *Shahaadada Adeegga*. Farqiga udhaxeeya *Cadaynta Adeegga* iyo *Shahaadada Adeegga* waa in *Shahaadada Adeegga* aysan ubaahanayn in lasaxiixo afka hore ee nootaayada.

You may file one *Affidavit of Service* or *Certificate of Service* listing multiple documents, but only if you serve those documents on the same date and on the same parties.

Waxaad gudbin kartaa hal *Cadaynta Adeegga ah* ama *Shahaadada Adeegga* adoo kuqoraaya dukumiintiyada badan, laakiin kaliya haddii aad dukumiintiyadaas soo gudbisay taariikh iskumid ah aadna udiray dhinacyo iskumid ah.

For additional instructions on proof of service, see [Minn. R. Civ. App. P. 125.04](#).

Wixii tilmaamo dheeri ah oo kusaabsan cadaynta adeegga, kafiiri [Minn. R. Civ. App. P. 125.04](#).

For simplicity, this packet assumes that you are serving the other parties by mail.

This packet includes a *Certificate of Service By Mail* for each of the documents you need to file to start an appeal. The *Certificate of Service By Mail* must include, from top to bottom: **Si loofududeeyo, baakadaan waxay uqaadanaysaa inaad dhinacyada kale dukumiintiga ugu dirayso boostada.**

Baakadaan waxaa kujira *Shahaadada Adeegga oo Boostada Lagu Dirayso* ee dukumiinti kasta oo aad ubaahan tahay inaad gudbiso si aad ubiloowdo racfaanka. *Shahaadada Adeegga lagu Dirayso Boostada* waa in lagu diraa, sal iyo baar:

- The parties’ names and case file number;
Magacyada iyo nambarka kiiska qolada;
- County where the form was signed;

Degmada foomka lagu saxiixay;

- The name of the person who served the documents;
Magaca qofka bixiyay dukumiintiyada;
- The titles of the documents that were served (on the *Certificate of Service* forms included with this packet, the titles of the documents are already filled in);
Ciwaanada dukumiintiyada lagudbiyay (ee kuqoran foomamka *Shahaadada Adeegga* ee kujirta baakadaan, ciwaanada dukumiintiyada horay loo gudbiyay);
- The date the documents were served;
Taariikhda dukumiintiga lagudbiyay;
- The names of the parties who were served and the addresses to which the documents were mailed to those parties;
Magacyada dhinacyada loodiray dukumiintiga iyo ciwaanada dukumiintiyada boostada loogu diray dhinacyadaas;
- The signature of the person who served the documents, the date the form was signed, and the county and state where the form was signed.
Saxiixa qofka dukumiintiyada diray, taariikhda foomka lasaxiixay, iyo wadanka iyo gobalka foomamka lagu saxiixay.

- The person who served the documents by putting them in the mail must complete and sign the form titled *Appellant's Certificate of Service by Mail of the Notice of Appeal and Statement of the Case*.

Qofka diray dukumiintiyada ee boostada kudiray waa inuu buuxiyaa uuna saxiixaa foomka ciwaankiisu yahay *Shahaadada Racfaanka ee Adeegga lagu diray Boostada ee Ogaysiiska Racfaanka iyo Bayaanka Kiiska*.

- File the *Appellant's Certificate of Service by Mail of the Notice of Appeal and Statement of the Case* by mailing it to the Clerk of the Appellate Courts (see Step 3 above for instructions on how to file documents).

Kugudbi *Shahaadada Adeegga Racfaan Qaataha Boostada Ogaysiiska Racfaanka iyo Bayaanka Kiiska* adoo boostada ugu diraaya Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka (fiiri talaabada 3 ee kore si aar uga hesho tilmaamaha sida aad ugudbinayso dukumiintiyada).

**Step 6: Receive the *Notice of Case Filing*
and correct any deficiencies**

Talaabada 6: Hel *Ogaysiiska Racfaanka* kadibna kasax wixii khaladaad ah

After you file your *Notice of Appeal* and *Statement of the Case*, the Office of the Clerk of the Appellate Courts will assign your appeal an appellate court file number and will send you a *Notice of Case Filing*. If you did not provide the court with an email address in your contact information, the *Notice of Case Filing* will be mailed to you. If you provided the court with your email address, the *Notice of Case Filing* and all other correspondence from the court will be distributed to your email address. The *Notice of Case Filing* will list any problems (“deficiencies”) with your appeal paperwork that need to be corrected before your appeal can move forward.

Kadib markaad dirto *Ogaysiiska Racfaanka* iyo *Bayaanka Kiiska*, Xafiiska Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka ayaa racfankaaga usamaynaaya nambarka faylka maxkamada racfaanka kuunasoo diraaya *Ogaysiiska Gudbinta Kiiska*. Haddii aadan siin maxkamada ciwaanka iimeelka ee kujira macluumaadka lagaalaso xariirayo, *Ogaysiiska Gudbinta Kiiska* ayaa laguugusoo dirayaa boostada. Haddii aad maxkamada ukeento ciwaankaaga iimeelka, *Ogaysiiska Gudbinta Kiiska* iyo dhamaan xariirada kale ee kasoo gaara maxkamada waxaa lagu soo marinayaa ciwaankaaga iimeelka. *Ogaysiiska Gudbinta Racfaanka* ayaa qoraaya caqabado kasta (“cilado”) oo kajira dukumintiga racfaankaaga kuwaasoo ubaahan in lasaxo kahor intaan racfaankaaga lasii wadin.

- Receive the *Notice of Case Filing* from the Clerk of the Appellate Courts.

Hel *Ogaysiiska Gudbinta Kiiska* oo aad kahelayso Karaaniga Maxkamadaha Racfaanka.

My appellate case file number is A _____ - _____ .
Nambarka kiiskayga racfaanku waa

- Review your *Notice of Case Filing* to see if there are any deficiencies. If there are deficiencies, you will have ten days to correct them.

Dib u eegis kusamee *Ogaysiiskaaga Gudbinta Kiiska* si aad u aragto haddii ay jiraan wax cilado ah. Haddii ay jiraan wax cilado ah, waxaad helaysaa toban maalmood inaad kusaxdo.

- Correct all deficiencies listed. If you do not correct the deficiencies that are listed in your *Notice of Case Filing*, the Court of Appeals may dismiss your appeal.

Sax dhamaan ciladaha liiska kujira. Haddii aadan sixin ciladaha kujira *Ogaysiiskaaga Gudbinta Kiiska*, Maxkamada Racfaanada aya diidi karta racfaankaaga.

Step 7: Order your *Transcript* (if applicable)

Talaabada 7: Dalbo *Qoraalka* (haddii ay jiraan)

In addition to the parties’ briefs, the “district court record” is the only information that the Court of Appeals considers in an appeal. The district court record includes documents filed in the district court and evidence used in the hearings before the district court judge or housing court referee.

Marka laga tago warbixinta kooban ee dhinacyada, “diiwaanka maxkamada degmada” waa warbixinta kaliya ee Racfaanada Maxkamada ku tixgelinayso racfaan. Diiwaanka maxkamada degmada waxaa ku jiro waraaqaha lagu xareeyay maxkamada degmada iyo cadeymo lagu isticmaalay dhageysiga garsooraha maxkamada degmada ama rifariiga maxkamada guriga hortood.

The district court record might also include a *transcript* of the hearing(s) before the district court judge. A *transcript* is a typed copy of what all of the witnesses, parties, and the judge said at your hearing. You should order a transcript of each hearing that you wish the Court of Appeals to consider as part of your postconviction appeal. The deadline for ordering your *transcript* is 30 days after you filed your *Notice of Appeal*. [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 9.](#)

Diiwaanka maxkamada degmada waxaa sidoo kale ku jiri karo *qoraalka* dhageysiga (dhageysiyada) garsooraha maxkamada degmada hortiisa ah. *Qoraalka* waa nuqul la qoray oo waxa dhammaan marqaatiyada, dhinacyada, iyo garsooraha ka sheegeen dhageysiga. Waa inaad codsataa qoraalka dhagaysi kasta oo aad doonayso in Maxkamada Racfaanadu dib u eegto ayadoo qayb ka ah racfaankaaga xukunka kadib. Waqtiga kama danbaysta ah ee dalbashada *qoraalka* waa 30 maalmood kadib arkaad buuxiso *Ogaysiiska Racfaanka*. [Minn. R. Crim. P. 28.02, subd. 9.](#)

Answer each of the questions below to decide whether you need to request a transcript of a district court hearing. If you do NOT need to request a transcript, skip to Step 8. If you DO need to request a transcript, follow the instructions on the next page.

Ka jawaab su'aal kasta si loo go'aamiyo in aad u baahan tahay codsiga qoraalka dacwad-dhagaysiga maxkamadda degmada. HADDII AADAN u baahneyn codsiga qoraalka, u gudub Tallaabada 8. Haddii AAD u baahan tahay codsiga qoraalka, waa in aad raacdo waxyaabaha ku qoran bogga dambe.

If transcripts were already prepared and filed for a direct appeal of your conviction, you will NOT need to order a transcript of hearings that took place before your postconviction petition. Those transcripts are already part of the record and will be available to the appellate courts. SKIP to Step 8.

Haddii qoraalada la diyaariyay oo loo xareeyey rafcaan toos ah ee xukunkaaga, UMA baahnid in aad soo codsato qoraalka dacwad-dhageysiga ee dhacay ka hor codsigaaga ka dambeeyey dambiga lagugu helay. Qoraalladaas horay ayey uga jireen diiwaanka oo waxaa heli doona maxkamadaha racfaanka. U GUDUB Tallaabada 8.

If any of the following three situations is true, you WILL need to request a transcript for your postconviction appeal:

Haddii uu run yahay mid ka mid ah saddexda xaaladood ee soo socda, WAA in aad soo codsato qoraal ah rafcaanka helista dembigaaga ka dib:

- 1) If an evidentiary hearing was held on your petition for postconviction relief, then **you WILL need to order a transcript of the hearing on your petition for postconviction relief**.

Haddii dacwad-dhageysi ah caddeymaha laguugu qabtay codsigaaga ah cafiska ee helista dambiga ka dib, markaas **WAA in aad soo codsato qoraalka dacwad-dhageysiga ee codsigaaga ah cafiska ee helista dambiga ka dib**.

- 2) If you had a direct appeal of your conviction but no transcripts were prepared for the direct appeal, AND some of the hearings before your postconviction petition are relevant to your postconviction appeal, then **you WILL need to order a transcript of any relevant hearings that took place before your postconviction petition**.

Haddii aad racfaan toos ah ka qaadatay xukunka dambiga balse aan qoraal lagaaga diyaarin rafcaanka tooska ah, IYO markay qaar ka mid ah dacwad-dhegeysiyadii ka horreeyey codsigaaga xukunka khuseeyaan rafcaanka helista dambiga ka dib, markaas **WAA in aad codsato qoraalka dacwad-dhegeysiyadii dhacay ka hor codsiga helista dambiga**.

- 3) If you did **not** have a direct appeal of your conviction and some of the hearings that took place before your postconviction petition are relevant to your postconviction appeal, then **you WILL need to order a transcript of any relevant hearings that took place before your postconviction petition**.

Haddii **aadan** racfaan toos ah ka qaadan xukunka dambiga ee qaar ka mid ah dacwad-dhegeysiyadii ka horreeyey codsigaaga xukunka khuseeyaan rafcaanka helista dambiga ka dib, markaas **WAA in aad codsato qoraalka dacwad-dhegeysiyadii dhacay ka hor codsiga helista dambiga**.

If you **DO** need to request one or more transcripts, follow the instructions below for each transcript you need to request:

Haddii **AAD** u baahan tahay in aad codsato hal qoraal ama ka badan, waa in aad qoraal kasta oo aad soo codsaneyso u raacdo tilmaamaha soo socda:

- For each hearing you are requesting a transcript of, gather this information:

Dhagaysi kasta oo aad codsanayso qoraalkiisa, soo aruurso macluumaadkaan:

(1) District court case file number for your case/Nambarka faylka kiiska maxkamada degmada ee kiiskaaga: _____

(2) Date of the hearing(s)/Taariikhda dhagaysiga (dhagaysiyada) lasameeyay: _____

(3) Name of the judge at the hearing(s)/Magaca xaakimka dhagaysiga (dhagaysiyada) qabtay: _____

You will need to provide this information when you request the transcript.

Waxaad ubaahan tahay inaad keento macluumaadkaan markaad codsato qoraalka.

- Call court administration at the district court where your hearing took place for instructions on how to request a transcript. You can find contact information for the district court at <http://www.mncourts.gov/Find-Courts.aspx>.

Wac maxkamada maamulka ee degmada maxkamada halkaasoo dhagaysigaagu kadhacay si aad uhesho tilmaamo laxariira sida aad ucodsanayso qoraalka. Waxaad kahelaysaa macluumaadka xariirka ee maxkamada degmada barta <http://www.mncourts.gov/Find-Courts.aspx>.

- Follow court administration's instructions to request a transcript. To request a transcript, court administration should provide you with the following information:

Raac tilmaamaha maamulka maxkamada si aad ucodsato qoraal. Si aad ucodsato qoraal, maamulka maxkamadu waa inay kusiiyaan macluumaadka soosocda:

(1) Court reporter's name/ Magaca Wariyaha Maxkamada: _____

(2) Court reporter's contact information/Macluumaadka lagala xariiraayo wariyaha maxkamada: _____

- Pay the fee for the transcript. After you submit your transcript request, the court reporter will contact you and will provide you with an estimated cost to prepare the transcript and the estimated date when the transcript will be complete. Payment must be made before the transcript is prepared.

Dhiib qarashka qoraalka. Kadib markaad dirto codsigaaga qoraalka, wariyaha maxkamada ayaa kulasoo xariiraaya, kadibna kuusheegaaya qarashka lafilaayo inay kubaxdo diyaarinta qoraalka iyo xiliga lafilaayo in qoraalku diyaar noqdo. Qarashka waa in ladiibaa kahor intaan qoraalka ladiyaarin.

What if I cannot afford the transcript fee?

Kawaran haddii aanan awoodin qarashka qoraalka?

- If you qualify for representation by the Office of the Minnesota Appellate Public Defender, that office can assist with requesting a transcript without requiring a fee. Call (651) 201-6700 to determine whether you qualify for representation and to request assistance with your transcript request.

Haddii aad uqalanto matalaada Xafiiska ee Difaaca Dawladu Bixiso ee Racfaanka Minnesota, xafiisnaan ayaa kaacaawin kara codsashada qoraalka adoon qarash dhiibin. Wac (651) 201-6700 si loo go'aansho inaad uqalanto iyo inkale matalaad iyo inaad codsato caawimaad lagaa siiyo codsigaaga qoraalka.

- Even if you don't qualify for representation by the appellate public defender, you can request that the district court waive your transcript fees. Instructions and forms for making this request are available at

<http://mncourts.gov/GetForms.aspx?c=19&p=70>. These forms must be filed in the district court where your case was decided.

Xataa haddii aadan uqalmin matalaad uu kuusameeyo difacaha dawlada ee racfaanka, waxaad kacodsan kartaa maxkamada degmada inay kaadhaafto qarashaadka qoraalka. Tilmaamaha iyo foomka dirista codsigaan ayaad kahelaysaa <http://mncourts.gov/GetForms.aspx?c=19&p=70>. Foomamkaan waa in lagu buuxshaa maxkamada degmada ee kiiskaaga lagu go'aanshay.

- Provide the court reporter with the names and contact information for the other parties involved with the appeal, so that the court reporter can provide them with copies of the transcript. **It is the appellant's responsibility to order copies of any transcript being prepared for appeal for all the other parties to the appeal.**

